

## Koolkoolinta ilmaha (The Social Baby)

Dadku waxay u malayn jireen in carruurta aanay wax badan samayn karin, waxa keliya oo ay u baahan yihiin ay tahay daryeel iyo quudin. Hadda waxaa la ogaaday inay carruurta u baahan yihiin wax ka badan cunta siin, nadiifin, xafaayad u gelin, seexashada iyo boonbalayaal yaryar oo ay ku cayaaraan. Waxay u baahan yihiin waxyaalla badan oo ay ka mid yihiin:

- inay daryeelaan daryeellayaal ay garanayaan kuwaas oo yaqaan ayna ku qanacsan yihiin
- in la siiyo koolkoolin iyo xiriir jireed ama qabasho
- fursada kula xiriirida cayaarsiin iyo la hadal
- fursadaha wax ku barida qalabka lagu cayaaro iyo iska dhigida kuwa kale.

Baaritaan ayaa muujiyey in carruurta ku tanaado xiriirka ay la leeyihiin waalidkood iyo dadka kale, xiriiradaasina waa kuwa asaaska u ah caafimaadka iyo horumarka aadanaha. Si kale haddii hadalka loo dhigo koolkoolinta, daryeelida iyo xiriir wax ku oolla oo ugu yaraan hal qof oo qaangaara ahi la yeesho ilmaha wuxuu asaaska u dhigaa barasho iyo koritaan caafimaad qaba. Muhiimadaas iyada ah, carruurta xiriiradaas waxay ka cayaaraan door firfircoon bilawga.

Carruurta waxay la sameeyaan dadka xiriir laga bilaabo markay dhashaan, waxayna u dhaqmaan dariiqa gaara in kasta oo ay waxyaalla badan ku kala duwan yihiin. Waa muhiim in la barto akhrinta sirtooda. Ilma walbaa wuxuu leeyahay mawqif u gaara iyo wuxuu jecel yahay, masalan, jeclaanta ama nebaanta habsiinta badan iyo haynta ee ilmaha, dariiqoyinka ay ku muujiyaan inay gaajaysan yihiin ama daalan yihiin, iyo waxa oohintoodu tahay waqtiyada kala duwan.

Baarayaasha maskaxdu shaqadii ay dhowaan qabteen waxay ku muujiyeen caddayn taageeraysa muhiimada koritaanka hore ee imanimada. Maskaxda, oo aan si buuxda u horamarin, way isbedeshaa waxaana sabab u ah waxa ilmuhu soo maro noloshiisa iyo doorka hida-raaca. Si kale haddii hadalka loo dhigo, dabecada iyo nafaqaynta ayaa muhiim u ah koritaanka maskaxda. Tayada daryeelka, nafaqada, dhiirigelinta iyo waxa ilmuhu soo maro ayaa raad ku leh sida wadooyinka xidida maskaxdu isugu xirmaan kuwaas oo ugu dambayn saameeya barashada iyo koritaanka hore.

Waxay kaloo sameeyaan la xiriirid laga soo bilaabo dhalashada waxayna leeyihiin awoodda kale oo kala duwan. Ilaa markay dhashaan waxay doonayaan inay ogaadaan sida wax walbaa u shaqeeyaan, sida lagu xaliyo arrin, siday degaankooda u maamushaan, iyo siday uga shaqaysiiyaan wax walba. Waxay isticmaalaan awoodooda oo dhan si ay midaas u gaaraan.

Sida ugu fiican oo lagu baran karo ilmahaaga waa iyada oo loo fiirsado. Lynne Murray iyo Liz Andrews, qorayaasha Your social baby: Understanding your baby's communication from birth (ACER, Melbourne 2001) ayaa farta ugu fiiqay waalidka in..

'daawashada ilmahaaga - fahmida dabecada ilmahaagu in aanay ahayn wax iska dhacay laakiin waxay kuu sheegi kartaa waxyaalla muhiima oo ku saabsan sida ilmahaagu ula qabsanayo adduunka - waxaana lagugu hagi karaa inaad siiso daryeelka ugu muhiimsan' (bogga 13).

Markaad wax badan ka ogaato carruurta waxay kuu sii noqonaysaa wax fiican inaad markhaanti ka noqoto qaybna ka qaadato barashada ilmaha.



Dadaalka

Waxaa kaalmeeyey